



Developmental Disabilities Administration (DDA)
Ogeysiiska Dhicitaanka Isqoritaanka Da'da Afaraad (4)
Notification of Age Four (4) Enrollment Expiration

Taariikhda:

Magaca iyo Cinwaanka

Magaca iyo Cinwaanka Wakiilka

KU SAABSAN: **Ogeysiiska Dhicitaanka Isqoritaanka Da'da Afaraad (4) ee _____**

Cunugaaga wuxuu hadda ku qoran yahay Maamulka Naafonimada Koritaanka (DDA). Xaq-u-yeelashada cunugaaga ee DDA ayaa wuxuu dhacayaa maalintooda dhalashada ee afaraad. Si cunugaaga xaq ugu yeesho DDA, waa in aad dib u codsato ka hor inta cunugaaga uusan noqon afar jir. Cunugaaga waa in dib loo go'aamiyo in uu xaq u leeyahay mid ka mid ah xaaladahan soo socda: Dib-u-dhaca Koritaanka (saddex meelood ama in ka badan oo dib-u-dhac ah), Naafonimo Caqliga ah, Maskax-suux, Suuxid, Ootisim, ama Xaalad Neerfo ama Kale oo la mid ah Naafonimo Caqliga ah.

Waxaan ku soo lifaaqney Shaxda Dokumeentiyada Loo Baahan Yahay si laguu ogeysiyo waxa loo baahan yahay si dib-u-go'aamintan loo sameeyo.

Sideen mar kale u codsadaa?

La-xiriir shaqaalaha Xaq-u-yeelashada iyo Qaadashada DDA ugu yaraan 90 maalmood ka hor maalinta dhallashada afaraad ee ilmahaaga si aad u codsatid xirmada dib-u codsashada. Wuxaan codsigan sameyn karaa adiga oo codsi qoraal ah soo gudbinaya aa wacaya lambarta telefoonka hoos ku xusan. Xirmada codsiga ayaa boostada laguugu soo dirayaa. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa dokumentiyada codsiga barta internet-ka adiga oo booqanaya <https://www.dshs.wa.gov/dda/consumers-and-families/eligibility>.

Ka waran haddii aanan dib-u-codsan?

Haddii aadan codsan xirmada dib-u-codsashada ama haddii aadan soo celin codsiga ugu yaraan 60 maalmood ka hor taariikhda dhalashada cunuga, xaq-u-yeelashada DDA ayaa dhacaya maalintooda dhalashada afaraad. Haddii ilmahaaga uu adeeg lacagtiisa la bixiyo ka helo DDA, adeeggan wuxuu dhammaan doonaa maalintooda dhalashada ee afaraad.

Dhicitaanka isqoritaanka DDA ma saameyn doono ka-qaybgalka barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah ama xaq-u-yeelashada SSI. Dhicitaanka isqoritaanka DDA ma saameyn doono adeeg DSHS kastoo kale ee laga yaabo in aad helayso, sida Medicaid, TANF ama khaararka cuntada.

Fadlan sida ugu dhakhsiyaha badan ugu soo jawaab, laakiinse ugu yaraan 90 maalmood ka hor maalinta dhalashada afaraad ee ilmahaaga. Haddii aanan warkaaga helin, waxaan u qaadanaynaa in aadan doonayn in aad sii wado ilmahaaga in aad ku qorto DDA. Jiritaan la'aanta dokumentiyada habboon ee xaalad xaq u leh da'da afaraad (4) xaq-u-yeelashada DDA ee ilmahaaga iyo adeegyada DDA waxay dhici doonaan maalinta dhalashadooda (4^{aad}).

Haddii aad su'aalo qabto ama aad dooneyso in aad xirmo codsato, fadlan la xiriir

Magaca Maamulaha Kiiska

Lambarka telefoonka

Cinwaan limayl

Nuqulka xeerarka dowladda ee lagu maamulayo xaq-u-yeelashada ayaa la heli karaa marka la codsado ama waxaa laga heli karaa bartan internet-ka <https://www.dshs.wa.gov/dda/consumers-and-families/eligibility>.

cc: Faylka macmiilka

Shaxda Dokumentiyada Loo Baahan Yahay, Bogga 1aad ee 2aad

Xaaladda Naafonimada	Da'thy	Diagnosis / Oggaaanshaha	Takhtarka oggaaday nooca cudurka	Diiwaannada Kale
Dib-u-dhaca Koritaanka	Dhalasha da (0) ilaa 19	Dib u dhaca Koritaanka ah	Dhakhtarka Shatiga Haysta; Dhakhtarka Daaweynta Dabiiciga ah ee Shatiga Haysta; Kaaliye Dhakhtar, Cilmi-nafsiyaqaan Shati-haysta ama Cilmi-nafsiyaqaanka Iskuulka ee la Aqoonsan Yahay, Dhakhtarka Hadalka iyo Luuqadda, Dhakhtarka Maqalka, Dhakhtar Daaweyn Hawleedka Shatiga Haysta, Dhakhtarka Daaweyn Jireedka, ARNP ama Kalkaaliye Caafimaad oo Diiwaangashan, Macallin La Aqoonsan Yahay, Shaqaalaha Bulshada Heerka Masterka, ama Takhlaslaha Hanuuninta iyo Dhaqdhaqaqa.	Dhalashada (0) ilaa 3, hal dib-u-dhac koritaan ama ESIT xaq u leh. Da'da 4 ilaa 19, saddex dib-u-dhac koritaan ama in ka badan. Dib-u-dhacyada waa in ay noqdaan meelaha sida dhaqdhaqaqa, war-isgaarsiinta, la-qabsi/is-caawin, bulsho/dareen, ama tacliinta/xirfadaha dhibaato xallinta, oo lagu cabbiro dhibic 1.5 ama leexsanaan beegal ah dheeraad ah oo ka hooseeya celceliska ama dib-u-dhaca da'da 25% oo ku saleysan daraaseyn hadda ee 18 bilood ee la soo dhaafey.
Naafonimo Maskaxeed	Dhalasha da (0) iyo ka weyn	Naafonimada Caqliga ah ama baartaanada kale ee u dhigma	Cilmi-nafsiyaqaan Shati Haysata, Cilmi-nafsiyaqaanka Iskuulka ee uu Aqoonsan Yahay Gobolka Washington; ama cilmi-nafsiyaqaanka kale ee iskuulka ee uu aqoonsan yahay Ururka Qaran ee Cilmi-nafsiyaqaanada Iskuulka	Cudurka laga helay waa in lagu diiwaangeliyaa warixintabaaritaanka iyo dhibcaha tijaabinta xirfadaha la-qabsiga ee in ka badan laba leexsanaan beegal ah oo ka hooseeya tirosinka ee la buuxiyay gudaha 36 bilood ee ugu dambeeyay.
Maskax Suux	Dhalasha da (0) iyo ka weyn	Maskax-suux ama waxyeelada la midka ah ee soo gaarta maskaxda ee keenaysa baaralaysnimo addinkaa oo buuxda ama qayb ahaan ah	Dhakhtarka Shatiga Haysta; Dhakhtarka Daaweynta Dabiiciga ah ee Shatiga Haysta; ama Kaaliyaha Dhakhtarka ama Xirfadle Kalkaaliye Caafimaad oo Diiwaangashan (ARNP) oo lala xiriirinayo xirfadda neerfaha.	Macluummaadka taageeraya baahida loo qabo caawimaadda jireed ee tooska ah ee maalinlaha ah ee laba ama in ka badan meelahan soo socda: musql adeegsiga, qubeyska, cunto cunista, lebbisashada, dhaqdhaqaqa, ama war-isgaarsiinta.
Qalal	Dhalasha da (0) iyo ka weyn	Qallal ama Xanuun suuxdin	Dhakhtarka Neerfaha ee Shatiga Haysta	Ogaanshaha cudurka ee ku saleysan taariikhda caafimaadka iyo baaritaanka neerfaha, xaqijintaa laga helay dhakhtarka ama dhakhtarka neerfaha ee suuxdinta joogtada ah in kastoo ay jiraan waxqabadyo caafimaad, iyo dhibcaha tijaabada xirfadaha la-qabsiga ee in ka badan laba leexsanaan beegal ah oo ka hooseeya celceliska la sameeyay 36 bilood ee la soo dhaafey gudahooda.

Shaxda Dokumentiyada Loo Baahan Yahay, Bogga 2aad ee 2aad

Xaaladda Naafonimada	Da'da	Diagnosis / Oggaaanshaha	Takhtarka oggaaday nooca cudurka	Diiwaannada Kale
Xaaladda Autism	Dhalasha da (0) iyo ka weyn	Xanuunka Ootisimka (Autism Spectrum Disorder) haddii ay ka horreyso 1-da Febraayo, 2022	Shati-haysta: Dhakhtarka neerfaha, Dhakhtarta waalida, Cilmi-nafiyaqaan, Dhakhtarka Hab-dhaqanka iyo Koritaanka Carruurta; Xarunta Heerka Sare sida lagu qeexay WAC 182-531A-0200; ama Dhakhtarka Shatiga haysta, Dhakhtarka Daaweynta Dabiiciga ah, ARNP, Kaaliyaha Dhakhtarka ee Lala Xiriirinayo xarunta ootisimka ama xarunta koritaanka.	Cudurka laga helay waa in lagu diiwaangeliya warixintabaaritaanka iyo dhibcaha tijaabinta xirfadaha la-qabsiga ee in ka badan laba leexsanaan beegal ah oo ka hooseeya tirosinka ee la buuxiyay gudaha 36 bilood ee ugu dambeeyay.
Xaaladaha neerfahal kale ama Xaalad Kale oo la mid ah Naafonimada Caqliga	Dhalasha da (0) iyo ka weyn	Xanuun dareemeyaasha ama koromosoomyada ee la garanayo in ay sababaan yaraanshaha xirfadaha la qabsashada iyo caqliga	Dhakhtarka Shatiga Haysta, Dhakhtarka Daaweynta Dabiiciga ah, Hiddo-side Yaqaan, ama ARNP ama Kaaliyaha Dhakhtarka ee lala xiriirinayo bukaaneegtada neerfaha ma xaruntabaaritaanka hiddo-sidaha.	Baaritaanka xaqa u leh iyo tijaabinta xirfadaha la-qabsiga ee muujinaya xadidaadda weyn ee shaqeynta la-qabsiga ee ka badan laba leexsanaan beegal ah ee ka hooseeya celceliska la dhammeeyay 36 bilood ee ugu dambeeyay.
Ogow: Foomkan waa hage guud oo kaliya oo DDA waxay u baahan kartaa macluumaad dheeraad ah ama daraaseyn. Dokumentigan waa tallaabada koowaad ee go'aaminta xaq-u-yeelashada isqoritaanka. Xaq-u-yeelashada isqoritaanka DDA ayaa loo go'aamiyay si waafaqsan cutubka WAC ee 388-823.				